

تعلم معي الصومالية ILA BARO SOOMALIGA

تأليف

مؤمن يوسف عالم جيلي

مدرس اللغة الصومالية

بقسم اللغات الأفريقية

معهد البحوث والدراسات الأفريقية

جامعة القاهرة

تقديم

أ.د. محمد علي نوفل

أستاذ الدراسات اللغوية ولغتي الهوسا والسواحيلي

رئيس قسم اللغات الأفريقية - جامعة القاهرة

مراجعة

مقدم عبد الله أبو حسين

منسق الجالية الصومالية في فرنسا



تصميم مؤمن

www.daruur.com

تعلم معى الصومالية

ILA BARO SOOMALIGA

تأليف

مؤمن يوسف عالم جيلي

مدرّس اللغة الصومالية بقسم اللغات الأفريقية – جامعة القاهرة

تقديم

أ.د. محمد علي نوفل

أستاذ الدراسات اللغوية ولغتي الهوسا والسواحيلي

رئيس قسم اللغات الأفريقية – جامعة القاهرة

مراجعة

مقدم عبد الله أبو حسين

منسق الجالية الصومالية في فرنسا

جميع الحقوق محفوظة

الطبعة الأولى

٢٠١٦ / ١٤٣٧ هـ

رقم الإيداع: ٧٠١٦ / ٢٠١٦

الترقيم الدولي: ١ - ٠٣٦ - ٨٠٧ - ٩٧٧ - ٩٧٨

البريد الإلكتروني

mumin@daruur.com

تقديم

الحمد لله والصلاة والسلام على سيدنا محمد وعلى آله وصحبه وسلّم تسليماً كثيراً وبعد، فلا شك أن اللغة أداة التواصل بين الشعوب المختلفة، وطريق أساسي في التفاهم بين الأمم المتباينة، ومن هذا المنطلق نضع بين يدي القارئ العزيز كتاب **تعلم معي الصومالية**- الذي يمكن القارئ من الإلمام بمبادئ اللغة الصومالية بطريقة سهلة، ويأتي هذا العمل ضمن المساعي الهادفة إلى تعليم اللغة الصومالية التي تعدّ من أهم اللغات في القرن الأفريقي، حيث تنتشر هذه اللغة في جميع أرجاء الصومال وجيبوتي وفي بعض المناطق من إثيوبيا وكينيا، كما أنها من جملة اللغات التي تدرّس في قسم اللغات الأفريقية بمعهد البحوث والدراسات الأفريقية - جامعة القاهرة.

ولعل هذا العمل يساعد الدارسين والباحثين المهتمين بتعلم اللغة الصومالية، ويمكنهم من الإلمام بمبادئ هذه اللغة، وأتمنى أن يشكل اللبنة الأولى تتبعها خطوات -إن شاء الله تعالى- في شكل سلسلة تعليمية شاملة تغطّي اللغة الصومالية من جميع جوانبها بهدف مساعدة الدارسين على التعرف عليها وفهمها مما يساهم في عملية التواصل بينهم وبين أهل هذه اللغة.
والله ولي التوفيق.

أ.د. محمد علي نوفل

١٤ ربيع الثاني ١٤٣٧ هـ. ٢٤ / ١ / ٢٠١٦

القاهرة

GOGOLXAAR

Waxaa mahad iska leh Alle, naxariis iyo nabadgelyo sayidkeena korkiisa ha ahaato nabi Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, in badanna ha nabadgeliyo, intaa kaddib waxaan shaki ku jirin inay tahay luqadda midda isku xirta dadka kala duwan oo ayna tahay waddo muhim ah oo ay isku fahmaan ummadaha kala fog, annagoo arrintan ka shidaal qaadanayno akhristaha sharafta badan waxaannu hor dhigaynaa buugga – **ILA BARO SOOMAALIGA-** kaasoo u suurtagalinaya akhristaha inuu si sahlan wax uga ogaado asaaska af Soomaaliga, waxqabadkan wuxuu yimid isagoo ay la socdaan dadaallo ku wajahan baridda af Soomaaliga kaasoo lagu tiriyo afafka ugu muhimsan geeska Afrika, iyadoo luqaddan ay ku faafsan tahay dhammaan dactalada Soomaali iyo Jabuuti sidoo kale meelaha qaarkood oo ka mid ah Itoobiya iyo Kenya.

Sidoo kale waxay ka mid tahay luqadaha lagu dhigo qaybta afafka Afrika ee Machadka cilmibaarista iyo daraasaadka Afrika ee jaamacadda Qaahira.

Waxaa laga yaabaa waxqabadkan inuu u kaalmeeyo dadka wax baranaya iyo kuwa cilmi-baarista ku jira oo ku dadaalaya barashada afka Soomaaliga, wuxuuna u suurtagalinayaa inay wax ka ogaadaan asaaska luqaddan, waxaan rajaynayaa inuu noqdo dhistii ugu horraysay oo ay raaci doonaan talaabooyin - haddii Alle yiraahdo- iyagoo ku salaysan qaab duruus taxane ah oo dhammaystiran oo gaaraya dhinac walba afka Soomaaliga ka mid ah, si loogu kaalmeeyo dadka waxbaranaya inay bartaan afka Soomaaliga oo ay fahmaan, taas oo ka mid ah waxyaalaha xoojinaya xiriirka ka dhexeeya iyaga iyo dadka luqadda u dhashay.

Alle baa towfiiqda iska leh

Pro. Maxamed Cali Nowfal

14/4/1437 H. 24 / 1 / 2016 M.

Qaahira

كلمة المراجع

بسم الله والحمد لله، والصلاة والسلام على رسول الله، وعلى آله وأصحابه ومن والاه وبعد،
فلله الحمد الذي يسّر إتمام كتاب (تعلم معي الصومالية).
أولا يطيب لي أن أهنيئ شيخني وأخي مؤمن يوسف عالم الذي بذل جهدا في تأليف هذا
الكتاب، فهو كتاب قيم، يمكن أن يستفيد منه الطلاب الصوماليون والعرب.
يسعدني أن أكون مراجعا لهذا الكتاب، وكان ذلك بتوفيق من الله تعالى، وكما هو معلوم فإن
عمل الإنسان لا يخلو من خطأ، ولذا نرحب باقتراحات القارئ العزيز لعلها تفيدنا في الطبقات
الأخرى.
أسأل الله تعالى أن يجزي أخي عن هذا العمل خيرا وأن يبارك له في عمره، وآخر دعوانا أن الحمد
لله رب العالمين.

مقدم عبد الله أبو حسين

٦ جماد الأول ١٤٣٧ هـ. ٢٠١٦/٢/١٥

باريس

ORAAHDA DIBU-EEGAHA

Magaca Alle ayaan ku bilaabayaa, mahadna waxaa iska leh Alle, naxariis iyo nabadgelyo rasuulkii Alle korkiisa ha ahaato iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo dadkii isaga raacay, intaa kaddib,

Ilaah baa mahad iska leh oo fududeeyay dhammaynta buugga (ILA BARO SOOMAALIGA).

Ugu horreyn bogaadin iyo ducaba waxaa iga mudan Shekheyga oo ahna walaalkeyga Muumin Yuusuf Caalim, oo runtii ku dadaalay soo saarista buugga (ILA BARO SOOMAALIGA), waa buug aad u qiima badan, waxaa ka faa'ideysan kara Ardayda Soomaaliyeed iyo kuwa carabtaba, waxaan ku faraxsanahay inaan noqdo qofka muraajaceeyay, taasna waxay ahayd towfiiqda Allaha sarreeyay, fal aadane qalad lagama waayo, waxaannu soo dhoweynaynaa fikradda akhristaha sharafta leh, si looga faa'iidaysto marka la soo saarayo daabacadda kale.

Walaalkayga Alle ayaan u weyddiinayaa inuu kaga abaal mariyo wanaag, iyo inuu cimrigiisa dheereeyo, baryadeena waxaa ugu dambeeya in mahadda ay u sugan tahay Allaha caalamiinta rabbigooda ah .

Muqadam Abdullahi Abow Hussein

6/5/1437 H. 15/2/2016 M.

Paris

مقدمة

الحمد لله رب العالمين الذي جعل الناس في ألسنتهم مختلفين، والصلاة والسلام على أفصح الخلق أجمعين، سيدنا محمد وعلى آله وأصحابه ومن والاهم إلى يوم الدين. وبعد، فما لا شك فيه أن اللغة الصومالية لم تجد الدراسات الوافية بسبب الحروب الأهلية في الصومال منذ ١٩٩١م، وقد تعرّض كثير من المراجع الصومالية بعد نشوب الحرب للتدمير الكامل، فأصيبت بجرمان أثر في حركتها نحو التأليف والتدقيق، وهي بحاجة إلى دراسات مستفيضة من الباحثين، وجهود غير عادية من أهل اللغة.

انطلاقاً من هذا أقدم هذا الكتاب للذين يريدون تعلّم اللغة الصومالية، فهو مخصص لتعليم اللغة الصومالية بطريقة ميسّرة، حيث يعتمد الكتاب على أسلوب سهل في عرض الدروس، ويحتوي على واحد وثلاثين درساً في الجوانب المهمة من الحياة، وكل درس منها يتكون من مفردات، غالباً ما تكون مدعومة بالصور، ومن محادثة تدور حول تلك المفردات، وقبل المحادثة تعبير عن النفس بجمل بسيطة وهي لا تخرج أيضاً عن تلك المفردات، وذلك مما يجعل الطالب مستوعباً للدرس بشكل كامل، وكذلك قواعد نحوية أساسية لا غنى عنها في فهم المعنى، كما تحتوي بعض هذه الدروس على أسئلة تدريبية مع أجوبة منفصلة عنها.

هذا وقد صادفت نسخة هذا الكتاب باللغة الإنجليزية ترحيباً من قسم اللغات الأفريقية في جامعة هارفارد، حيث قدّمت هذه الطريقة في تدريس اللغة بعدما طلب مني قسم اللغات الأفريقية في جامعة هارفارد تأليف كتاب لتعليم اللغة الصومالية فالحمد لله أتمته بتوفيق من الله تعالى، وهذه النسخة تختلف عن صاحبها في بعض المحتويات، وأرجو أن تكون النسخ القادمة أكثر شمولاً وأكبر حجماً.

أختم كلامي بالشكر الجزيل لأبويّ الذين ربّاني تربية سعدتُ بها في مسيرتي، وأدعو الله تعالى أن يجعل جنة الفردوس مثوالمها، ولزوجتي العزيزة التي وقرت لي الأجواء المناسبة لتحقيق هذا العمل، ولإخوتي الذين ساندوني، ولأساتذتي الكرام الذين يصعب حصرهم في هذا المقام، ولأخي وصديقي المقربّ مقدّم عبد الله أبو حسين الذي تحمّل عناء المراجعة. أدعو الله العظيم أن يوفقنا جميعاً، وما توفيقي إلا بالله عليه توكلت وإليه أنيب .

مؤمن يوسف عالم جيلي

٢٩ ربيع الثاني ١٤٣٧ هـ

٢٠١٦/٢/٨

القاهرة

HORDHAC

Mahad Ilaahay baa iska leh oo Rabbiga caalamiinta ah, Allahaas oo ka dhigay dadka kuwa ku kala duwan afalkooda, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato sayidkeena nabi Mummaxad oo ahaa qofka ugu fasaaxad badan dadka oo dhan, sidoo kale nabadgelyo iyo naxariis ha ahaato ehelkiisa korkooda iyo asxaabtiisa iyo dadka iyaga raacay ilaa maalinta qiyaame. intaa kaddib.

Waxaan shaki ku jirin afka Soomaaliga inuusan helin daraasaad ku filan dagaallada sokeeye awgood ee Soomaali ka dhacay laga soo bilaabo sanadka 1991-kii, in badan raadraacyada Soomaaliyeed ka mid ah ayaa si daran loo baabi'iyay, afka Soomaaliga dandarro ayaa heshay oo saamaysay in si fiican wax looga qoro oo baaritaan xeeldheer lagu sameeyo, afka Soomaaliga dadka cilmibaarista sameeya wuxuu uga baahan yahay daraasaad farabadan, wuxuu kaloo uga baahan yahay dadka afka u dhashay dadaallo aan caadi ahayn, anoo taa ka duulaya waxaan u soo bandhigayaa buuggan dadka raba inay afka Soomaaliga bartaan waxaana loogu talaggalay in afka Soomaaliga si sahlan dadka loogu baro, buugga wuxuu ku dhisan yahay qaab sahlan xagga soo bandhigidda casharrada, wuxuu ka kooban yahay soddon iyo kow cashar oo ku saabsan dhinacyada nolosha ee muhimka ah, cashar kasta wuxuu ka kooban yahay ereyo, inta badan waxaa la socda sawirro, iyo wadasheekaysi oo aan ka baxaynin ereyadaas, waxaa ka hoorreeya wadasheekaysiga weero fudud oo qofka naftiisa kaga hadlaya oo aanna ka baxaynin ereyadaas, taas waxay ka dhigaysaa ardayga inuu casharka si fiican u qabto, sidaas oo kale casharrada waxaa ku dhexjira naxwe bilow ah oo aan lagaga maarmin fahanka ulajeeddada, sidoo kale casharradan qaarkooda waxaa la socda su'aalo layli ah oo wata jawaabo ka soocan.

Nuskhada buuggan oo afka Igiriiska ah waxaa aad ula dhacay maamulka qaybta afafka Afrika ee jaamacadda Harvard, taasoo aan u gudbiyay manhajkan oo luqadda dadka lagu barayo markuu iga dalbaday kaddib maamulka afafka Afrika ee jaamacaddaas inaan allifo buug af Soomaaliga dadka lagu barayo, Alle ayaa ku mahadsan, towfiiqda Allaha sarreeya baan

ku dhammeeyay, nuskhadan midda Ingiriiska waxyaalaha qaarkood ayay kaga duwan tahay, Allaha sarreeya waxaan ka baryayaa inay noqdaan nuskhadaha soo socda kuwa dhammaystiran kana weyn middan,

Hadalkayga waxaan ku soo gabagabaynayaa mahad ballaaran aan u jeedinayo aabbahayga iyo hooyadayda oo si fiican ii barbaariyay, barbaarintaas oo aan ku liibaanay, Allaha sarreeya waxaan ka baryayaa inuu ka dhigo deegaankooda jannada Al-fardow, sidoo kale mahad waxaa iga mudan xaaskayga sharafta badan oo ii fidisay jawi munaasib ah si aan u xaqiijiyo hawshan, iyo walaalahayga oo i garab-istaagay, iyo dhammaan dadka wax i baray oo aan halkan lagu soo koobi karin, iyo walaalkayga sidoo kale saaxiibkayga ii dhow ah Muqadam Cabdullaahi Abow Xuseen oo rafaadka muraajacada dusha saartay.

Ilaahay waxaan ka baryayaa inuu dhammaanteena towfiiqda na waafajiyo, towfiiqdaydana Ilaahay baa haya isagaanna talasaartay, xaggiisaanna u noqonayaa.

Muumin Yuusuf Caalim Jeele

26/4/1437 H. 8/2/2016 M.

Qaahira

CASHARKA KOOWAAD
ALIFBEETADA AF SOOMAALIGA

الدرس الأول
الأبجدية الصومالية

تتكون الأبجدية الصومالية من واحد وعشرين صامتا وعشر حركات، والصوامت في الصومالية حروف بسيطة ما عدا ثلاثة أحرف هي (kh) و (sh) و (dh) ، فهذه الأحرف الثلاثة مركبة من صامتين وتصدر صوتا واحدا، والأبجدية الصومالية ليس فيها حروف غير متوافقة مع لوحة مفاتيح الحاسوب العادية، وهي مشابهة في أغلب حروفها للأبجدية العربية حتى في ترتيبها.

النطق بالحروف الصومالية سهل ، ومما يدل على ذلك أن كل ما يكتب ينطق، ولا يتغير هذا النطق بحال من الأحوال بخلاف بعض اللغات منها الإنجليزية، فمثلا كلمة (knife) في الإنجليزية لا تنطق كما هي مكتوبة بل يهمل حرف (k) في النطق، وكذلك كلمة (door) تختلف في النطق عن كلمة (tool) مع أن الحركة واحدة في الكلمتين.

Shibbaneyaasha | الصوامت

B	T	J	X	Kh	D
R	S	Sh	Dh	C	G
F	Q	K	L	M	N
W	H	Y			

Qaabka loogu dhawaaqo shibbaneyaasha

كيفية النطق بالصوامت

Ba	Ta	Ja	Xa	Kha	Da
Ra	Sa	Sha	Dha	Ca	Ga

Fa	Qa	Ka	La	Ma	Na
Wa	Ha	Ya			

Shaqallada | الحركات

Shaqal gaaban | حركة قصيرة

A	E	I	O	U
---	---	---	---	---

Shaqal dheer | حركة طويلة

AA	EE	II	OO	UU
----	----	----	----	----

Jadwalka shibbaneyaasha Af Soomaaliga

جدول صوامت اللغة الصومالية

Shibbanaha	Dhawaaqa alifbeetada caalamiga	Tusaale Soomaali	Macnaha
الصامت	الألفبائية الصوتية الدولية	مثال صومالي	المعنى
b	[b]	baraf	ثلج
t	[t]	tartan	سباق
j	[dʒ]	jeer	فرس النهر
x	[ħ]	xaas	زوجة
kh	[x]	khuuro	غطيط

d	[d]	dab	نار
r	[r]	run	صدق
s	[s]	san	أنف
sh	[ʃ]	shinbir	عصفور
dh	[d̪]	dhul	أرض
c	[tʃ]	caano	حليب
g	[g]	gabar	فتاة
f	[f]	far	أصبع
q	[q]	qaaddo	ملعقة
k	[k]	kulan	لقاء
l	[l]	layli	تمرين
m	[m]	maskax	دماغ
n	[n]	naag	امرأة
w	[w]	warshad	مصنع
h	[h]	hooyo	أم
y	[j]	yar	صغير

Jadwalka shaqallada Af Soomaaliga

جدول حركات اللغة الصومالية

Shaqal gaaban | حركة قصيرة

Shaqalka	Dhawaaqa alifbeetada caalamiga	Tusaale Soomaali	Macnaha
الحركة	الألفبائية الصوتية الدولية	مثال صومالي	المعنى
a	[a]	dal	وطن
e	[e]	fure	مفتاح
i	[i]	bir	حديد
o	[o]	boqor	ملك
u	[u]	burbur	دمار

Shaqaldheer | حركة طويلة

Shaqalka	Dhawaaqa alifbeetada caalamiga	Tusaale Soomaali	Macnaha
الحركة	الألفبائية الصوتية الدولية	مثال صومالي	المعنى
aa	[a:]	daal	تعب
ee	[e:]	geel	إبل
ii	[i:]	jiir	فأر
oo	[o:]	nool	حي
uu	[u:]	suun	حزام

يلاحظ في بعض الأحيان فروق صوتية بين بعض الأسماء نظرا لجنسها، فمثلا الأسماء المذكورة تتسم بنبرة أقوى من الأسماء المؤنثة وينتج عن ذلك اختلاف في المعنى مع أن أصل البنية واحد كما يوضح ذلك الجدول التالي:-

المذكر		المؤنث	
taag (-ga)	هضبة	taag (-ta)	قوة
beer (-ka)	كبد	beer (-ta)	مزرعة
shilin (-ka)	شلن	shilin (-ta)	قرادة
tuug (-ga)	لص	tuug(-ta)	صدقة
tuur (-ka)	ركام	tuur (-ta)	حدبة
gar (-ka)	لحية	gar(-ta)	حق
bir (-ka)	وميض	bir(-ta)	حديد

أهمية الفرق بين الحركة القصيرة والطويلة

الحركة الطويلة والحركة القصيرة والفرق بينهما هو جوهر الصومالية والجدول التالي يوضح لك بعض الكلمات التي يتغير معناها إذا مدّت الحركة القصيرة فيها، وهذا كثير في المفردات الصومالية:

dal	وطن	daal	تعب
dad	ناس	daad	سيل
jir	جسم	jiir	فأر
sun	سم	suun	حزام
bur	دقيق	buur	جبل
ur	رائحة	uur	حمل
bal	شجرة الذرة	baal	جناح

bad	بحر	baad	غصب
gal	غلاف	gaal	كافر
bun	بن	buun	بوق
gob	سدر	goob	مكان
dur	اطعن	duur	غابة
dul	ظهر	duul	ناس
jin	جن	jiin	ضفة
tag	اذهب	taag	قوة
tir	امسح	tiir	عمود
war	خبر	waar	ياردة
gar	لحية	gaar	خاص
fal	فعل	faal	عرافة
fan	فن	faan	فخر
bar	علم	baar	فتش
xir	أغلق	xiir	احلق
dir	أرسل	diir	قشر
shir	مؤتمر	shiir	دفر
dhar	لباس	dhaar	قسَم
lis	احلب	liis	قائمة

CASHARKA LABAAD
SALAAMAHA

الدرس الثاني
التحيات



Subax wanaagsan.	صباح الخير.
Galab wanaagsan.	مساء الخير.
Habeen wanaagsan.	مساء الخير.
<i>Ma fiican tahay?</i>	هل أنت بخير؟
Haa, waan fiicanahay.	نعم، أنا بخير.
<i>Ma roon tahay?</i>	هل أنت جيد؟
Haa, waan roonahay.	نعم، أنا جيد.
Nabad ma ku bariday?	هل أصبحت بخير؟
<i>Haa, nabad baan ku bariyay.</i>	نعم، أصبحت بخير.
Ma ladan tahay?	هل أنت في رغد؟
<i>Haa, waan ladanahay.</i>	نعم، أنا في رغد.
Sidee tahay/ See tahay?	كيف حالك؟
<i>Waan fiicanahay.</i>	أنا بخير.
Familkaaga sidey yihiin?	كيف أسرتك؟
<i>Familkayga way fiican yihiin.</i>	أسرتي بخير.

Aabbahaaga siduu yahay?	كيف حال والدك؟
<i>Aabbahayga wuu fiican yahay.</i>	والدي بخير.
Hooyadaada sidey tahay?	كيف حال والدتك؟
<i>Hooyadayda way fiican tahay.</i>	والدتي بخير.
Ninkaaga siduu yahay?	كيف حال زوجك؟
<i>Ninkayga wuu fiican yahay.</i>	زوجي بخير.
Xaaskaaga sidey tahay?	كيف حال زوجتك؟
<i>Xaaskayga way fiican tahay.</i>	زوجتي بخير.
Carruurtaada sidey yihiin?	كيف حال أطفالك؟
<i>Carruurtayda way fiican yihiin.</i>	أطفالي بخير.
Ma caafimaad qabtaa?	هل أنت بصحة؟
<i>Haa, waan caafimaad qabaa.</i>	نعم، أنا بصحة.
Familkaaga ma caafimaad qabaan?	هل أسرتك بصحة؟
<i>Haa, famil kayga way caafimaad qabaan.</i>	نعم، أسرتي بصحة.
Aabbahaaga ma caafimaad qabaa?	هل والدك بصحة؟
<i>Haa, aabbahayga wuu caafimaad qabaa.</i>	نعم، والدي بصحة.
Hooyadaada ma caafimaad qabtaa?	هل والدتك بصحة؟
<i>Haa, hooyadayda way caafimaad qabtaa.</i>	نعم، والدتي بصحة.
Ninkaaga ma caafimad qabaa?	هل زوجك بصحة؟
<i>Haa, ninkayga wuu caafimaad qabaa.</i>	نعم، زوجي بصحة.
Xaaskaaga ma caafimaad qabtaa?	هل زوجتك بصحة؟
<i>Haa, xaaskayga way caafimaad qabtaa.</i>	نعم، زوجتي بصحة.
Carruurtaada ma caafimaad qabaan?	هل أطفالك بصحة؟
<i>Haa, carruurtayda way caafimaad qabaan.</i>	نعم، أطفالي بصحة.

CASHARKA SEDDEXAAD
ISBARASHO

الدرس الثالث
تعارف

Ereyo



مفردات

Magacyada familka	Mgacyada dheddiga	Magacyada labka
أسماء عائلية	أسماء الإناث	أسماء الذكور
Kulmiye	Sacdiyo	Xasan
Abroone	Farxiyo	Cali
Diinle	Faadumo	Maxamed
Barbaare	Nasteexo	Geeddi
Gaashaan	Caasho	Guuleed
Barre	Sucaado	Faarax

Magac	اسم	Macallin	مدرّس
Magaca familka	اسم العائلة	Farshaxanle	رّسام
Jamhuuriyad	جمهورية	Dhakhtar	طبيب
Masar	مصر	Ganacsade	تاجر
Nool	عائش / حيّ	Xirfadle	حرفي
Soomaali	الصومال	Injineer	مهندس
Fasax	عطلة	Farsamayaqaan	صانع
Bareeg	فسحة	Beeralley	فلاح
Wariye	صحفي	Shaqaaale	عامل
Dalxiise	سائح	Nasasho	راحة

Iska hadal



حدّث عن نفسك

Aniga waa Xasan Cali, nambarka taleefankayga waa : 2165038,

Nambarka moobeylkayguna waa 055327772

Nambarka xafiiskana waa :2165078, emailkayguna waa xasan@daruur.com, waxaan ka imid Soomaali, waxaanna ahay macallin, waxaan dhigaa Af-Soomaaliga, shaqada waxaan ku aadaa bas iyo tareen, waqtiyada nasashada waxaan la gutaa saaxiibayaashayda.

أنا حسن علي، رقم هاتفي : ٢١٦٥٠٣٨ و رقم محمولي ٠٥٥٣٢٧٧٧٢ و رقم المكتب: ٢١٦٥٠٧٨ و بريدي الالكتروني هو xasan@daruur.com جئت من الصومال، وأنا مدرس أدّرس اللغة الصومالية، أذهب إلى الجامعة في أيام العمل بالباص والقطار، وعند الاستراحة أقضي الأوقات مع زملائي.

Sheekaysi



سأدئة

Cabdiraxmaan: waa kuma adiga magaca?

عبد الرحمن: من أنت وما اسمك؟

Xasan: aniga waa Xasan

حسن: أنا حسن.

Cabdiraxmaan: waa maxay magacaaga dambe?

عبد الرحمن: ما اسم عائلتك؟

Xasan: magacayga dambe waa Cali

حسن: اسم عائلتي علي.

Cabdiraxmaan: waa maxay nambarka moobeylkaaga?

عبد الرحمن: ما رقم جوالك؟

Xasan: nambarka moobeylkayga waa 055327772

حسن: رقم جوالي: ٠٥٥٣٢٧٧٧٢

Cabdiraxmaan: waa maxay nambarka xafiiskaaga?

عبد الرحمن: ما هو رقم مكتبك؟

Xasan: nambarka xafiiskayga waa: 2165078

حسن: رقم مكنتي: ٢١٦٥٠٧٨

Cabdiraxmaan: waa maxay emailkaaga?	عبد الرحمن: ما هو بريدك الإلكتروني؟
Xasan: emailkayga waa xasan@daruur.com.	حسن: بريدي الإلكتروني xasan@daruur.com
Cabdiraxmaan: waa maxay nambarka jidkaaga?	عبد الرحمن: ما هو رقم شارعك؟
Jidkayga nambarkiisa waa 77	حسن: رقم شرعي هو ٧٧
Cabdiraxmaan: jidkee degan tahay?	عبد الرحمن: في أي شارع تسكن؟
Xasan: waxaan deganahay waddada Makka almukarrama.	حسن: أسكن في شارع مكة المكرمة.
Cabdiraxmaan: xaafaddee?	عبد الرحمن: في أي حي؟
Xasan: xaafadda Hodan.	حسن: في حي هدن.
Cabdiraxmaan: halkey ku taallaa Hodan?	عبد الرحمن: أين هدن؟
Xasan: Muqdisho.	حسن: في مقديشو.
Cabdiraxmaan: dalkee?	عبد الرحمن: في أي بلد؟
Xasan: Jamhuuriyadda Soomaaliya.	حسن: في جمهورية الصومال.

Naxwe  قواعد

Dhisidda weedha بناء الجملة

الجملة في الصومالية تطلق على الكلام المركب المفيد وغير المفيد، وعلى ذلك تنقسم الجملة إلى تامة وناقصة، وهذا ليس غريبا، بل يوجد رأي عند بعض اللغويين العرب في تعريف الجملة يوافق تعريف الجملة في الصومالية، يقول الجرجاني في تعريف الجملة: (الجملة

عبارة عن مرّكب من كلمتين أسندت إحداهما إلى الأخرى سواء أفاد كقولك: زيد قائم أو لم يفد كقولك: إن يُكرمني فإنه جملة لا تفيد إلا بعد مجيء جوابه ، فتكون الجملة أعمّ من الكلام مطلقاً^١.

Weedh dhiman

جملة ناقصة

Haddii aan guriga gato.	إن اشتريتُ المنزل.
Haddii aad lacag u baahan tahay.	إن كنتَ محتاجاً إلى نقود.
Geedka dheer.	الشجرة الطويلة.

Weedh dhan

جملة تامة

Ninka ayaa tagay.	الرجل ذهب.
Ninka baa tagay.	
Ninka aa tagay.	
Naagta ayaa tagtay.	المرأة ذهبت.
Naagta baa tagtay.	
Naagta aa tagtay.	
Aadan ayaa dhoofay.	آدم سافر.
Aadan baa dhoofay.	
Aadana a dhoofay.	
Waxaa tagay ninka.	ذهب الرجل.
Waxaa tagtay naagta.	ذهبت المرأة.

^١ - التعريفات للشريف الجرجاني ص ١١٠

Waxaa dhoofay Aadan.	سافر آدم.
Saalax waa macallin.	صالح مدرّس.
Magacayga waa Saalax .	اسمي صالح.

Weedh magaceed

جملة اسمية

Macallinka ayaa casharka qoray.	المدرّس كتب الدرس.
Tuugga baa cararay.	اللصّ هرب .
Axmedaa ii yimid.	أحمد أتاني.
Idiris macallin weeye .	إدريس معلّم.
Idiris macallin weeyaan .	
Idiris macallin waaye ¹ .	
Idiris waa macallin .	
Af daboolan waa dahab.	الفمّ المغلق ذهبٌ (السكوت من ذهب).

Weedh faleed

جملة فعلية

Waa qoray macallinka casharka.	كتب المدرّس الدرس.
Macallinka wuu qoray casharka.	
Eyga waa qayliyay .	نبح الكلب.
Waa qayliyay eyga.	
Wiilka waa qoslay.	ضحك الولد.
Waa qoslay wiilka.	
Waxaa qayliyay eyga.	نبح الكلب.

¹ - في لهجات الجنوب

Eyga wuxuu qayliyay xalay.	نبح الكلب البارحة.
Guriga waxaa la galay muuse.	دخل معه البيت موسى.
Wuxuu la galay guriga muuse.	دخل البيت مع موسى.

Qurub diiradeed | أداة إسنادية

Waa	Waa cunay Cali mooska.	أكل علي الموز.
Baa	Faarax baa albaabka garaacay.	فأرح دق الباب.
Ayaa	Saciid ayaa Soomaali u dhoofay.	سعيد سافر إلى الصومال.
Waxaa/waxa	Waxaa cabbay caanaha Haaruun.	هارون شرب الحليب.
Aa	Qaraxaa dhacay.	حدث انفجار.
Ma	Ma rabtaa?	هل تريد؟
Ma	Ma rabo.	لا أريد.
Sow	Sow ma rabtid?	ألا تريد؟
Ha	Ha tago.	فليذهب.

الأدوات الإسنادية مع ضمائر الفاعل المتصلة

Ayaa

Aniga	ayaa	+aan	ayaan	أنا
Adiga	ayaa	+aad	ayaad	أنت
Isaga	ayaa	+uu	ayuu	هو

Iyada	ayaa	+ay	ayay	هي
Innaga	ayaa	+aynu	ayaynu	نحن
Annaga	ayaa	+aannu	ayaannu	نحن
Idinka	ayaa	+aydin	ayaydin	أنتم
Iyaga	ayaa	+ay	ayay	هم

Baa

Aniga	baa	+aan	baan	أنا
Adiga	baa	+aad	baad	أنت
Isaga	baa	+uu	buu	هو
Iyada	baa	+ay	bay	هي
Innaga	baa	+aynu	baynu	نحن
Annaga	baa	+aannu	baannu	نحن
Idinka	baa	+aydin	baydin	أنتم
Iyaga	baa	+ay	bay	هم

Waa

Aniga	waa	+aan	waan	أنا
Adiga	waa	+aad	waad	أنت
Isaga	waa	+uu	wuu	هو
Iyada	waa	+ay	way	هي
Innaga	waa	+aynu	waynu	نحن
Annaga	waa	+aannu	waannu	نحن
Idinka	waa	+aydin	waydin	أنتم

Iyaga	waa	+ay	way	هم
--------------	-----	-----	-----	----

Waxaa

Aniga	waxaa	+aan	waxaan	أنا
Adiga	waxaa	+aad	waxaad	أنت
Isaga	waxaa	+uu	wuxuu	هو
Iyada	waxaa	+ay	waxay	هي
Innaga	waxaa	+aynu	waxaynu	نحن
Annaga	waxaa	+aannu	waxaannu	نحن
Idinka	waxaa	+aydin	waxaydin	أنتم
Iyaga	waxaa	+ay	waxay	هم

CASHARKA AFARAAD
ISBARITAANKA

الدرس الرابع
التعريف بالآخرين

Ereyo



مفردات

Gurijoog	ربة منزل
Kalkaaliso	ممرضة
Isbitaal	مستشفى
Helid	حصول على
Saaxiib	صديق
Xaas	زوجة
Eeg	انظر
Dhalasho	ميلاد
Carruur	أطفال
Taariikh	تاريخ

Iska hadal



حدّث عن نفسك

Kan waa kuma?

Kan waa xasan, isaga waa saaxiibkayga, wuxuu ka yimid Jamhuuriyadda Soomaaliya, waa nin xaas leh iyo carruur, xaaskiisu waa kalkaaliso waxay ka shaqaysaa isbitaalka, iyada waxay ku dhalatay Soomaali halkaasna ayay ku barbaartay, carruur bayna haysataa.

من هذا؟

هذا حسن ، هو صديقي جاء من جمهورية الصومال، هو رجل متزوج وعنده أطفال، زوجته ممرضة تعمل في المستشفى، هي وُلدت في الصومال وتربّت هناك وعندها أطفال.



Maxamuud: muxuu kuu yahay kan?

محمود: من هذا بالنسبة لك؟

Yuusuf: isaga waa saaxiibkayga oo Soomaali ah.

يوسف: هو صديقي من الصومال.

Maxamuud: muxuu sameeyaa?

محمود: ماذا يعمل؟

Yuusuf: isaga waa macallin.

يوسف: هو مدرّس.

Maxamuud: xaas ma leeyahay?

محمود: هل عنده زوجة؟

Yuusuf: haa, iyada kalkaaliso ayay isbitaalka ka tahay.

يوسف: نعم، هي ممرضة في المستشفى.

Maxamuud: halkey ku dhalatay?

محمود: أين وُلدت؟

Yuusuf: waxay ku dhalatay Soomaali halkaasna ayay ku soo barbaartay.

يوسف: وُلدت في الصومال وترّبت هناك.

Maxamuud: goormay halkan timid?

محمود: متى أتت هنا؟

Yuusuf: waxay timid halkan sanadka 1996-kii.

يوسف: جاءت هنا عام ١٩٩٦.

Maxamuud: ma guursatay?

محمود: هل تزوجت؟

Yuusuf: haa way guursatay carruurna way leedahay.

يوسف: نعم، تزوجت وعندها أطفال.

Maxamuud: ma garanaysaa kan?

محمود: هل تعرف هذا؟

Yuusuf: ma garanayo qofkan.

يوسف: لا أعرف هذا الشخص.



Magacuyaalka madax-bannaan | الضمير المنفصل

Aniga	أنا	Aniga waan soo toosaa.	أنا أستيقظ.
Adiga	أنت	Adiga waad soo toostaa.	أنت تستيقظ.
Isaga ¹	هو	Isaga wuu soo toosaa.	هو يستيقظ.
Iyada ²	هي	Iyada way soo toostaa.	هي تستيقظ.
Annaga	نحن	Annaga waannu soo toosnaa.	نحن نستيقظ.
Innaga	نحن	Innaga waynu soo toosnaa.	نحن نستيقظ.
Idinka	أنتم	Idinka waad soo toostaan.	أنتم تستيقظون.
Iyaga ³	هم	Iyaga way soo toosaan.	هم يستيقظون.

¹ - مثلها asaga

² - مثلها ayada

³ - مثلها ayaga

CASHARKA SHANAAD
JIRKA DADKA 1

الدرس الخامس
جسم الإنسان ١

Ereyo



مفردات



Weji

وجه




Madax

رأس



Il

عين



Af

فم



Ilko

أسنان



Carrab

لسان



Bushin

شفة



Gar

لحية



Gacan

يد



Timo

شعر



Suniyo

حواجب




Lug

رجل



Jilib

ركبة



Luqun

رقبة



Far

أصبع



Cag

قدم



Bowdo

فخذ



Suul

إبهام




Dhudhun

ذراع



Dhabar

ظهر



Jir

جسم

 <p>Ciddi ظفر</p>	 <p>Shaarbo شارب</p>	 <p>Dheg أذن</p>
 <p>San أنف</p>	 <p>Daan خدّ</p>	 <p>Xidid عرق</p>

Iska hadal



هدّت عن نفسك

Madaxa ayuu iga dhuftay.

ضربني في الرأس.

Timo dheer baan leeyahay.

عندي شعر طويل.

Qoortayda ma dheera.

رقتي ليس طويلة.

Jilibkayga waa bararsan yahay.

رقتي متورّمة.

Waxaan rabaa sankayga inaan baaro.

أريد أن أفحص أنفي.

Carrabkayga waa guduudan yahay.

لساني أحمر.

Laftayda waan ilaaliyaa.

أحافظ على عظمي.



Xuseen: waad salaaman tahay.

حسين: السلام عليك¹.

Dhakhtarka: waan kaa qaaday, maxaa kugu dhacay?

الطبيب: وعليك السلام، ماذا حدث لك؟

Xuseen : lugta iyo qoorta ayaan xanuun ka dareemayaa.

حسين: أشعر بألم في الرجل والرقبة.

Dhakhtarka: ma wax baa kugu dhacay?

الطبيب: هل أصابك شيء؟

Xuseen: jaranjarada ayaan ka dhacay.

حسين: سقطت من السلم.

Dhakhtarka: faraha xanuun ma ka dareemaysaa?

الطبيب: هل تشعر بألم في الأصابع؟

Xuseen: maya, waxaan ka dareemayaa dhabarka iyo bowdada iyo gacanta.

حسين: لا، أشعر في الظهر والفخذ واليد.

Dhakhtarka: bomaatadan qaado una adeegso jirkaaga oo

الطبيب: خذ هذا المرهم واستخدمه في جميع جسمك كل ليلة قبل النوم.

¹ - والترجمة الحرفية : تحية لك

dhan habeen kasta hurdada ka
hor.

Xuseen: mahadsanid.

حسين: شكراً.

Dhakhtarka : adaa mudan.

الطيب: عفواً.

Su'aalo



أسئلة

Ma furi kartaa ishaada?

هل تستطيع فتح عينك؟

Xanuun ma ka dareemaysaa
lugaha?

هل تشعر بالألم في الرجلين؟

Ma ku socon kartaa lugahaaga?

هل تستطيع المشي برجليك؟

Ma dhaqday wejigaaga?

هل غسلت وجهك؟

Hadda ilkaha ma nadiifin kartaa?

هل تستطيع تنظيف الأسنان الآن؟

Ma xiirtaa timahaaga?

هل تخلق شعرك؟

Goormaad weysaysatay?

متى توضأت؟

Jawaabo



أجوبة

Haa, waan furi karaa.

نعم، أستطيع فتحها.

Haa, xanuun baan lugaha ka
dareemayaa.

نعم، أشعر بألم في الرجلين.

أهم المصادر والمراجع

- 1-Qaamuuska Af-Soomaaliga Yaasiin Keenadiid
- 2-Qaamuuska Af-Soomaaliga Annarita Puglielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur
- مؤمن يوسف عالم (المؤلف) مؤمن يوسف عالم (المؤلف)
- الشريف الجرجاني الشريف الجرجاني
- ٣-الكاشف - قاموس عربي صومالي
- ٤-التعريفات

المحتويات

الصفحة	الموضوع
7	مقدمة
10	الدرس الأول : الأبجدية الصومالية
16	الدرس الثاني: التحيات
18	الدرس الثالث: تعارف
26	الدرس الرابع: التعريف بالآخرين
29	الدرس الخامس: جسم الإنسان ١
35	الدرس السادس: جسم الإنسان ٢
40	الدرس السابع: الأسرة
45	الدرس الثامن: المنزل
53	الدرس التاسع: المدرسة
59	الدرس العاشر: الحياة اليومية
62	الدرس الحادي عشر: الأعداد
71	الدرس الثاني عشر: الوقت والفصول والطقس
77	الدرس الثالث عشر: الطعام والمطعم
82	الدرس الرابع عشر: الفواكه والخضار ١
89	الدرس الخامس عشر: الفواكه والخضار ٢
94	الدرس السادس عشر: الصحة
99	الدرس السابع عشر: الثياب والألوان
106	الدرس الثامن عشر: البيع والشراء
109	الدرس التاسع عشر: النقل والمواصلات
115	الدرس العشرون: الخرائط والجهات
119	الدرس الواحد والعشرون: السياحة

125	الدرس الثاني والعشرون: الأدب والمجتمع
135	الدرس الثالث والعشرون: الألعاب
139	الدرس الرابع والعشرون: الحكايات
145	الدرس الخامس والعشرون: الحفلات والمناسبات
154	الدرس السادس والعشرون: الرسم والصناعة اليدوية
160	الدرس السابع والعشرون: البيئة
165	الدرس الثامن والعشرون: المواشي والدواجن
180	الدرس التاسع والعشرون : حشرات، زواحف، برمائية
185	الدرس الثلاثون: الطيور
191	الدرس الواحد والثلاثون: الوحوش

المحتويات النحوية

الصفحة	الموضوع	م
20	بناء الجملة	١
28	الضمير المنفصل	٢
38	ضمير الفاعل المتصل	٣
49	ضمير الملكية	٤
56	أدوات الاستفهام	٥
61	ضمير المفعول المباشر	٦
69	ضمير المفعول غير المباشر	٧
76	المبني للمجهول	٨
81	اسم الإشارة	٩
85	أدوات الشرط	١٠
92	اسم الموصول	١١

98	الضمير المنعكس	١٢
103	المفرد والجمع	١٣
112	السوابق (حروف الجرّ)	١٤
117	ظرف المكان	١٥
122	ظرف الزمان	١٥
127	التعريف	١٦
143	الصفة	١٧
147	الأفعال	١٨
157	المتعدي واللازم	١٩
164	النفى	٢٠
168	أفعال الملكية	٢١
174	أفعال الكينونة	٢٢
183	أن المصدرية	٢٣
188	الروابط	٢٤
196	المضاف إليه	٢٥